Warbixinta Arrimaha Bini'aadamnimada
SOOMAALIYA

1 – 31 Luulyo 2019

QODOBBADA

- Qorshaha saameynta abaaraha oo lugu dhawaaqay
- Ayax laga cabsi qabo inuu ku habsado Bariga Afrika
- Istaraatiijiyadda Horumarinta Xoolaha
- Barakacayaal ku qulqulaya Baydhabo
- Ololaha tallaalka daacuunka oo la qaaday
- Warbicinta deeqaha

TIRADA

# Dadka cunto u baahan (FSNAU: April, 2019)	5.4m
# Dadka ku jira xaaladaha degdegga ah ee heerka 3aad iyo 4aad (IPC Phases 3&4, Apr 2019)	2.2m
# Dadka ku jira cunto-yari heerka 2aad (IPC Phase 2, Apr 2019)	3.2m
# Caruurta la qiyaasayo iney nafaqa darro heyso	1.2m
# Barakaca gudaha	2.6m

DEEQAHA

$1.08 BILYAN
Dalabka Qorshaha ka Falcelinta Baahiyaha Bini'aadamnimada ee HRP 2019

$450 MILYAN
Deeqda loo helay HRP 2019

Source http://fts.unocha.org, 31 July 2019

Suuq xoolo oo ku yaalla Burco, Somaliland (WFP photo)

Nuqulkan waxaa ku jira

Warbixinta Sugnaanta Cuntada P.1
Warbixinta Xoolaha P.2
Warbixinta Barakaca P.3
Warbixinta Caafimaadka P.3
Warbixinta Deeqaha P.4

Qorshaha Ka jawaabidda Saameynta Abaarha oo la diyaarshay

Xilli-roobaadkii *Gu-ga (Abr-Juun)* ee 2019 wuxuu ahaa mid hooseeya si simanna aan u wada gaarin gobollada oo idil, oo weliba ay wehliso in roobku uu bilowday waqti aad uga danbeeyay xilligii la filaayay. Arrintani waxay dhacday laba sano kadib markii abaarti 2016/2017ay baabi'isay ilihi shaqo ee dadka ayna barakicsay ku dhawaad 1 milyan oo Soomaali ah-inkastoo dadaal xoogan oo la sameeyay iyo kordhinta gargaarka bani'aadannimo ay keentay in lagu guuleystay in laga hortago macluul-hadana cimilada oo xun oo lagu daro caqabadaha bani'aadannimo ee horay u jiray, colaadaha meelaha qaar. Barakaca oo dheeraaday siina socda ayaa wali Soomaaliya u sii dhaweynaya in ay dhacdo xaalado deg deg ah oo dhinaca bani'aadannimada ah.



Biyaha webiga oo ka hooseeyay intii lugu yaqiin bilaha Maarso-Maajo darteed ayaa waxaa hoos u dhacay dalagga beeraha gaar ahaan dadka ku nool hareeraha webiyada. Source: FAO-SWALIM

Roobabki Guga oo liitay soona daahay ayaa sababay abaaro xooggan intabadan degaannada Somalia horraanti bishi May, taasi waxay maalyiin Soomaali dhigtay cunta yari, waxaase aad u dareemay culayska dadka nugul iyo barakacayaasha. Si taas looga jawaabo, Dowladda Federalka ah ee Soomaaliya iyo Hey'adaha Gargaarka waxay diyaariyeen Qorshaha Ka Jawaabidda Saameynta Abaarta. Qorshahan ayaa siin doona kaalmo naf-badbaadin ah ilaa 4.5 milyan oo qof oo Soomaali hadda ilaa dhammaadka sanadkan waxana qorshahan uu ku kacayyaa qarash gaarayya $686 million.

Sugnaan la'aanta cuntada aad bey u xoogantahay waxeyna cirib aan wanaagsaneyn ku reebi kartaa 2.2 Milyan oo Soomaali ah oo wajahayya heerka ugu liita ee lagu cabiro cunto yarida. Dalagga beeraha ayaa u muuqda in uu 50% ka hooseeyo heerka meel dhexaadka ah meelaha qaarna qiyaastaas waa ka sii hooseeyaa. Nafaqa yarida, xanuunnada abaarta iyo barakaca ayaa uga sii daraya nuglaashaha horay u jiray. "Ayuu yiri George Conway, Sii-Hayaha Isu-Duwaha Gargaarka ee Soomaaliya. "Waxaan bogaadinayyaa Dowladda Faderalka ah ee Soomaliya sida ay u muujisay hoggaaminta iyo mudnaansiinta in la kordhiyo Gargaarka looga jawaabayo Saameynta roob yarida. Waxaan ugu baaqayaa deeqbixiyayaasha in si buuxda u maalgaliyaan qorshahaan si looga fogaado musiibo baahsan."

$686 milyan ayaa loo baahanyahay si kaalmo naf-badbaadin ah loo gaarsiiyo 4.5 milyan oo Soomaali ah.

Soo noq noqoshada abaarta ayaa tilmaan cad u ah in Soomaaliya wali u nugushahay saameynta isbedalka cimilada. "*iyadoo ay muhiim tahay in laga jawaabo baahiyaha bad-baadineed ee nolosha ee taagan, waxaa sidaas oo kale lagama maarmaan ah in la xoojiyo itaalka bulshada ee dhinaca u adkeysiga aafooyinka iyo in la maalgaliyo horumarinta lana xoojiyo itaalka Soomaaliya si ay isaga waajahdo culeysyada mustaqbalka. Maxaa yeelay ma'aha in abaar kasta na gaarsiiso musiibo*," Waxaa yiri Md. Xamsa Saciid Xamsa, wasiirka Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka. "*Waxaa naga go'an in aan ku soconno raadinta xal waara innagoo ka shaqeysiineyna hab-howleedka u adkeysiga iyo soo kabashada waxaana taageero ka fileynaa saaxibada caalamka ee na taageera.*"

Saameynta taban iyo baaxad yarida Guga iyo xilliga Deyrta ee 2018-ki (Okt-Dis), oo xumaa oo ay ugu sii darsantay jiilaalki horraanta 2019ka ayaa raad aan wanaagsanayn ku reebay bulshooyinki horay ula daalaa dhacayay ka soo kabashada abaarti 2016/17ka. Iyadoo ay xaaladdu sidan u murugsantahay, hadana howlgallada gargaar ee dalka waxay ahaayeen kuwo aan haysan lacag ku filan iyadoo Qorshaha ka jawaabidda baahiyaha bini'aadamnimada ee 2019ka uu kaliya helay $450 lacagihi loo baahnaa miisaaniyad ahaan. Taasi waxey qasab ka dhigtay in hay'adaha xaddidaan dadaalkooda gargaar xilli kordhin loo baahnaa.

Ayax looga cabsanayo Geeska Afrika

Raxan ayax ah waxay baabi'i kartaa 170,000 oo tan oo badar ah, oo ku filan iney quudiso 1 milyan oo qof muddo hal sano ah.

Maamullada iyo bahwadaagta sugnaanta cuntada waxay qiimeynayaan xalladda Ayaxa, gaar ahaan, Somaliland halkaas oo raxan ayaxa lagu arkay dhowr meelood intii lagu jiray todobaadkii ugu horreey bisha Luulyo, taas oo sababeysa khasaare xaga dalaga miraha ah oo weyn. Kooxo ayax ah ayaa la sheegay iney ukuma ku dhalayaan Xeebaha Woqooyi Galbeed ilaa Woqooyi Bari. Tani waxay sii kordhin kartaa tirada ayaxa dhammaadka bisha Agoosto sida ay ku warbixisay Hey'adda Cuntada iyo Beeraha ee FAO.

Ilaa iyo sannadkii 2016/2017, Maamullada Somaliland iyo Puntland waxay lahaayeen Qaybo ama Xafiisyo ka shaqeeya Ayaxa iyo Saraakiil loo tababaray la dagaallanka Ayaxa. La socod joogto ah iyo xakameyn xilli hore ah ayaa muhiim ah si looga hortago dhalashada tiro badan oo Ayax ah kaas o sababi kara aafo biniaadamnimo. Ayaxa wuxuu ku keeni karaa khatar baaxad weyn leh dalagga xilliga Guga iyo xillig beerashada soo socda ee Soomaaliya oo dhan. Raxan ayax ah waxay keeni kartaa khasaare dhan 170,000 oo tan oo badar ah, oo quudin karta hal milyan oo dad ah sannadkiiba.

Tobanaan kun oo milyan oo Ayaxa ayaa duulaya hawada kuwaas oo ku xawaareynaya 150 kilometer maalintiiba. Waxay noolaan karaan qiyaastii muddo seddax bilood ah ayadoo ayaxa dhidigga ah dhali karto 300 oo ukumood. Halkii xabo oo Ayax ah wuxuu cuni karaa cunto la eg culeyskiisa maalintiiba, ilaa labo garaam maalintii. Raxan yar oo Ayaxa ah waxay cuni karaan cunto la tiro eg inta ay cuni karaan 35,000 oo qofood maalintii.
http://www.fao.org/news/story/en/item/1203003/icode/

Istaraatiijiyadda Horumarinta Xoolaha

Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa hirgelisay istaraatiijiyad cusub oo ay oo la xiriirta horumarinta xoolaha, arrintan waxay ku timid dedaal ay hogaamineysay hay'adda FAO oo uu maalgeliyay Bangiga Adduunka. Istaraatiijiyaddani waxay qeexeysaa sida loo kobci karo xoolaha, loo suuq geyn karo, maal gashina loogu sameyn karo, tayada iyo bedqabka xoolahana loo hagaaji karo.

Xooluhu waa qaybta ugu weyn wadarta guud ee wax soo saarka gudaha-GDP, nolosha iyo kobaca dhaqaalaha.

Xooluhu waxay muhiimad dhaqaale iyo mid bulshaba u leeyihiin Soomaalida. In ka badan nus milyan qof oo reer miyi ah ayaa si dadban ama si toos ah ugu tiirsan xoolaha. Xooluhu waa qeybta ugu weyn ee Wadarta Guud ee Wax-soo-saarka Guda (GDP) ee Soomaaliya. Iyadoo taas ay jirto ayaa waxtarkii xoolaha waxaa hoos u dhigaayay dhibaatooyin ay ka mid yihiin nafaqa darro, cudurro, nabaad guur, kheyraadka dabiiciga ah oo kooban oo ay wehliso taag yarida hay'adaha dowliga ah.

Ra'iisal Wasaaraha Soomaaliya, Mudane Xasan Cali Khayrre, ayaa si rasmi ah u furay tababar looga dhawaaqaayay dhaqan galka istaraatiijiyaddan, wuxuuna ku baaqay in xal horay loogu mariyo xoolaha la dardar geliyo. Wasiirka xanaanada xoolaha iyo dhirta mudane Xuseen Maxamuud Sheekh ayaa bogaadiyey qorshaha wuxuuna ku sifeeyay iney tahay halbeeg weyn oo la gaaray Soomaaliya xoolaheedana laga tixgelin doono suuqyada adduunyada. Istaraatiijiyaddu waxay iftiimineysaa baahida loo qabo taageerada deeq bixiyeyaasha ee ku aaddan xoolaha.

Barakaca Baydhabo

In ka badan 5,000 oo barakacayaal ah ayaa soo galay magaalada Baydhabo labadii todobaad ee ugu horreeyay bisha Luulyo. Tirada dadka ku soo barakcaya magaalada Baydhabo ayaa cirka isku sii shareereysa ayadoo cluster-ka CCCM ay soo werinayaan in celcelis ahaan 1,000 qof ay soo geleysay magaalada Baydhabo todobaadkiiba.

In ka badan5,000 oo barakacayaal ah ayaa soo galay Baydhabo labadii todobaad ee ugu horreeyay Luulyo.

Inta badan dadkani, waa xoolo dhaqato-beeraley u qaxaya abaaraha iyo colaadaha awgood. Sida laga soo xigtay Clusers-ka protection-ka iyo CCCM, boqolkiiba 60 oo barakacayaashan ka mid ah waxay soo galeen magaalada Baydhabo si ay kaalmo bini'aadamnimo u helaan. Dadkan xaalkooda waxaa uga sii daraya amniga oo sii xumaanaya iyo canshuuro ay ku soo rogeen kooxaha hubeysani. Kooxahani waxay cadaadis saarayaan qoysaska ku nool tuulooyin hoos taga gobollada Bay iyo Bakool iney caruurtooda yaryarka ah ayaga ku soo wareejiyaan si askar ahaan ugu isticmaalaan. 340 qoys oo horay uga barakacay Bay iyo Bakool ayaa dib uga soo laabtay magaalooyinka Gaalkacyo iyo Dhuusamareeb ee Dowlad Goboleedka Galmudug kadib markii la bartilmaameedsaday ayadoo loo jeedinayo eedo la xiriiray iney gacan saar la leeyihiin ururka Al- Shabaab

Dadkan magaalada soo galay intooda badani waxay guryo cooshado ah ka dhisteen xaafado ay horay u deganaayeen dad barakacayaal ah. Hay'adaha samafalka iyo dowladduba waxay walaac ka qabaan in barakacani uu uga sii daro xaaladdii murugsaneed ee bini'aadamnimo ee horay u jirtay. Magaalada Baydhabo waxaa ku nool barakacayaal gaaraya 323,000-waana magaalada labaad ee ay ku noolyihiin barakacayaasha ugu badan marka laga reebo Muqdisho. Maamulka deegaanku wuxuu codsaday in sara loo qaado gargaarka bini'aadamnimada ee laga sameeyo Baydhabo iyo hareeraheeda. Dadkani waxay ugu baahi badanyihiin hoy ama gabbaad iney helaan maadaama ay baylah u yihiin qabowga iyo weliba iney xadgudub wajahaan.

Ololaha tallaalka daacuunka

Meelaha qaar ee waddanka ka mid ah ayaa u nugul daacuunka sababo la xiriira colaadaha daba dheeraaday, isbedellada cimilada, iyo nidaamka caafimaadka dadweynaha oo ah mid liita. Wasaaradda caafimaadka ee Federaalka, Hay'adda Caafimaadka Adduunka ee WHO waxay ka shaqeynayaan in xal joogto ah loo helo arrintan oo loo yareeyo faafitaanka cudurka.

Sannadkii 2017, Soomaaliya waxaa soo maray mid ka mid ah kiisaskii daacuun ee ugu xumaa oo haleelay dad gaaraya 78,000 oo qof ayna u dhinteen 1,159 oo dadkan ka mid ahi. Wixii waqtigaas ka danbeeyay, waxaa la xoojiyay nidaamka caafimaadka ee lugu daaweynayo ama looga hortegayo cudurkan, taas oo saamaxday in daacuunku uu gaaro marxalad la koontarooli karo. Bilowgii sannadka ilaa hadda, 1,040 oo ah kiisas looga shaki qabo iney yihiin daacuunka ayaa laga diiwaan geliyay 25 degmo oo badidooda ku yaalla daafaha webiyada Juba iyo Shabelle

2017, Soomaaliya waxaa ka dhacay mid ka mid ah kiisaskii daacuun ee ugu weynaa, wuxuuna haleelay 78,000 oo qof.

Si kastaba ha ahaatee, guulaha arrintan laga gaaray waa in la xajiyaa si looga baaqsado qataraha ka imaan kara soo laalaabashada cudurkan. WHO iyo dowladda Soomaaliya waxay fulinayaan mid ka mid ah ololihii tallaal ee ugu ballaarnaa ee laga hirgeliyo qaaradda Afrika ayadoo la isticmaalayo tallaalka afka ah, waxa kale oo arrintan gacan ka geysanaya hay'adda UNICEF, Gavi, Vaccine Alliance iyo Guddiga Xakameynta Daacuunka ee caalamiga ah. Wareeggii ugu horreeyay ee ololahan tallaalka ah waxaa la sameeyay intii u dhexeysay 22 iyo 28 bishii Juun ee sannadkan 2019 waxaana la gaaray caruur gaareysa 621,800. Degmooyinka ololahan laga sameeyay waxaa ka mid ah Heliwa, Xamar Jabjab iyo Kahda oo gobolka Banadir ka tirsan, Balcad iyo Afgooye oo Hirshabelle iyo Koofur Galbeed ka kala tirsan iyo magaalada Kismaayo ee Dowlad Goboleedka Jubaland. "*Waa inaan qofna u dhiman daacuun qarniga 21aad, annagoo weliba heysanna daawo casri ah. Waa masuuliyad na wada saran inaan ka wada shaqeyno sidii daacuunka loo dhameyn lahaa loona badbaadi lahaa dadka soomaaliyeed. Waxaa naga go'an inaan Soomaaliya ka cirib tirno cudurka daacuunka,"* ayuu yiri Dr Mamunur Rehman Malik, wakiil WHO ee Soomaaliya.

Kooxaha abaabulka bulshada ee degmooyinka laga shaqeynaayay ayaa si wanaagsan loo tababary ka hor intaanuu ololuhu bilaabanin. Kooxo UNICEF metelaayay ayaa qolyaha tallaalka fulinaayay uga warbixiyay arrimaha la xiriira tallaalka, diiwaan gelinta caruurta iyo sida ay tahay loola macaamilo dadka horay u seegay tallaalka. Wasiirka caafimaadka ee Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya Dr Fauziya Abikar Nur ayaa tiri "*daacuunku wuxuu ka mid yahay qataraha ugu waaweyn ee uu wajahayo caafimaadka dadweynuhu. Waxaan heysannaa farsamooyinkii looga hortegi lahaa in cudurkan qatarta ahi uu ka dillaaco Soomaaliya. Waxaan la shaqeyneynaa WHO iyo hay'adaha kale ee samafalka si loo baajiyo qatar caafimaad oo cudurkani uu keeni karo."*

Istaraatiijiyadda la isticmaalayo si looga hortago faafitaan degdeg ah oo uu sameeyo cudurka daacuunku waxaa la isticmaalayaa tallaal afka laga qaadanayo, waxaa kale oo socda dadaallo dadka lugu siinaayo biya nadiif ah oo ay cabbaan. Wareegga labaad ee ololaha tallaalka daacuunka wuxuu bilaabanayaa dhowaan.

SHF iyo CERF oo sara u qaadaya gargaarka



Ayadoo laga jawaabaayo xaaladda welwelka leh ee bini'aadamnimo ee ka jirta Soomaaliya ee ay sababta u yihiin colaadaha, barakaca iyo isbedellada cimilada, Sanduuqyada SHF iyo CERF waxay $83.3 milyan u qoondeeyeen gargaar naf badbaadis ah sannadkan 2019. Tan waxaa ku jira qoondada SHF ee standard allocation-ka oo gaareysa ($32.7 milyan) waxaana loogu talo galay meelaha ay ka jirto cunta yarida, nafaqa darrada ee ka jirta gobollada waqooyi iyo gobollada dhexe waxayna dhameystireysay $11. 9 milyan oo horay ka tirsaneed deeqdii CERF ee loogu talo galay gurmadka degdegga ah. Waxaa horay $8.7 milyan ay SHF ugu qoondeeysay in loogu gurmado dhulka ay abaaruhu sida daran ugu dhufteen ee koofurta Soomaaliya waxa kale oo $30 milyan oo ka timid sanduuqa CERF muhiimad gaar ah laga siiyay in gurmad degdeg ah lagu bixiyo intii u dhexeysay bilaha Juun iyo Luulyo ee 2019. Intan waxaa dheer $0.1 milyan oo ay SHF u qoondeysay isla xisaabtanka.

Ilaa hadda, $555.5 milyan ayaa usoo aruurtay mashruucyada gargaarka ee Soomaaliya, $450 milyan oo cadadkan ka mid ah ayaa lasoo marsiiyay Qorshaha ka Jawaabidda Baahiyaha Bini'aadamnimada halka $105 milyan ay ka soo xarootay dibedda qorshaha. Si kasta oo ay ahaataba, lacagta la helay ma ahan mid ku filan baahida taagan, waxaa kaalmo bini'aadamnimo u baahan dad Soomaaliyeed oo gaaraya 505 milyan. Deeq bixiyeyaasha waxaa laga dalbanayaa iney kordhiyaan deeqda.

Faahfaahinta, kala xiriir: Tapiwa Gomo, Head of Communication, gomo@un.org, Tel. +252 616 548 007. Mursal Ali Ahmed | Public Information Officer, mursalali@un.org, Tel: +252619150457/ 252615679998. OCHA humanitarian bulletins are available at www.unocha.org/somalia | www.unocha.org | www.reliefweb.int